



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qorolaaka kal.6-aad
Documentiga Kal.6-aad kul.7-aad

23/05/2015

Kalfadhiga 6-aad

Kulankiisa 7-aad Saac.Fur. 12:15gh-Saac. Xir.2:10gd.

Guntinta (Qourum) Xildh 158

Ajendaha

- 1. Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
- 2. Ansixinta Ajendaha**
- 3. Codsiga Xukuumadda ku saabsan hakinin fursad loo siiyo xalinta xaaladda cabashooyinka**
- 4. Dhameystirka habraaca Mooshinka Golaha Wakiiladda Jubba.**

1). Shir-guddoomiye Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaar).

Waxaa Shirka furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari), waxaana lagu furay Aayadah

2). Guddoomiyaha wuxuu sheegay in uu shirka furanyahay ,ayna ansixiyaan Xildhibaanada a Qur'aanka kariimka, uuna akhriyey Xildhibaan Sheekh shaacir. Ajendaha Shirka , Xildhibaanadana way ansaxiyeen.

3). Wuxuu kaloo sheegay in ay jiraan Laba arimood ay midi tahay: **weerar lagu soo qaadey Web-site-ka Baarlamanka, hadal been abuurna ay ka soo daayen ,dadka falkaas sameeyey uusan aqoon u laheyn cidda ay yihiin , wuxuuna u sheegay shacabka Soomaaliyeed in web-site,twitterka iyo Facebook -ga ay sheegayaa qolooyinkaas uusan iska lahayn Guddoomiyaha Baarlamanka .**

Wuxuu kaloo ka hadley arinta saaka dhacdey wuxuuna u xilsaarey Guddiga amniga Qaranka ee Baarlamanka ay baaritaan dhab ah ku sameeyaan, in la adkeeyo lana ilaaliyo waxyaabaha Muhiimka ah.

4). Guddoomiyaha wuxuu kaloo sheegay in Xukuumadda dhankooda ka soo gaartey warqad codsi ah oo ay ka soo codsadeyn Golaha Baarlamanka, in dib loogu dhigo muddo laba(2) usbuuc ah , si ay u soo xaliyaan arimaha Jubbooyinka ka taagan. Xalka arintaan waxay u taalaa Golaha Baarlamanka JFS.

Wuxuu intaa ku darey in la ilaaliyo haybadda iyo Sharafta Golaha Shacabka .waxaa xildhibaanada u banaan in ay soo jeediyaan Fikradahooda .

5). Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyey in labada usbuuc ay xukuumadda soo codsadeyn in cod la geliyo, inta aan cod la gelin ayaa tira-guud ee Xildhibaanada fadhida lagu sameeyey tirin iyadoo loo tiranaayey Saf-saf waxay u dhacdey sida tan:

Safka A. 21. Xildh.

Safka B. 19 Xildh

Safka C. 22 Xildh.

Safka D. 25 Xildh.

Safka E. 19 Xildh.

Safka F. 14 Xildh.

Safka G. 8 Xildh.

Safka H. 4 Xildh.

Tirada Guud Xildhibanada fadhiga waxay noqdeyn 130 Xildh.

6.-Guddoomiyaha wuxuu sheegay in tirada Xildhibaanada Saxiixday ay yihiin 158 Xildhibaan ,tiradda hadda loo keeney ay tahay 130 Xildhibaan in ay fadhigaan ,sidaa darteed, wuxuu sheegay Guddoomiyaha in aan Cod la gelinkarin maadaama uu kooranka yar yahay ,fadhiga xiga ayuu noqonayaa.

Kal.6-aad Kul.7-aad uu shir-guddoominaayey Guddoomiyaha Baarlamanka JFS.Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari) ,wuxuu sheegay in shirka xiran yahay saacaddu markey aheyd 02:20gd.